



Kotoutujan Digipolku

TILMAAMAHA DIGITALKA

Sidan ayaad u sameysan
kartaa ereyga sirta ah aadna
u xafidan kartaa

Waa sidee ereyga sirta ah ee wanaagsani?

- Ereyga sirta ahi waa inuu ahaado mid aad si fudud u xasuusan kartid, laakiin ay adag tahay in la maleeyo.
 - Ha u isticmaalin ereyga sirta ah tusaale ahaan magacaaga, lambaro taxane ah sida "123456" ama ereyo halhal ah sida "rovaniemi" ama "salasana" – waa kuwo si fudud loo garan karo ama jabsan karo.
 - Ha u isticmaalin ereyga sirta ah oo isku mid ah adeegyo kala duduwan, ee u sameyso mid walba mid cusub.
- Ereyga sirta ah ee wanaagsani waa inuu ahaado mid dheer, waxaana wanaagsan inuu ahaado ugu yaraan 10-12 calaamadood.
- Ereyga sirta ah ee wanaagsani waa inay ku jiraan xarfo WAAWEYN iyo kuwo yaryar, llambaro iyo calaamado khaas ah (tusaale ahaan? ! # % -)

Waxaad ereyga sirta ah u sameyn kartaa tusaale ahaan sidan:

- U dooro ereyga sirta ah weedh, taas oo ay kuu fududahay inaad xasuusato
 - Minulla on kissa
- Ku qor qeyb ka mid ah xarfaha kuwo yaryar, qeybna kuwo waaweyn
 - MinullaOnKiSSa
- Ku dar ereyga sirta ah lambaro iyo calaamado khaas ah
 - 4MinullaOn!KiSSa8

Sideen u xasuustaa dhammaan ereyadeyda sirta ah?

- Haddii aad dooneysid, waxaad isticmaali kartaa caawiyaha ereyada sirta ah managerigooda. Waa aalad, taas oo aad ku keydsan kartid dhammaan ereyadaada sirta ah. markaasna waxaa kugu filan, inaad xasuusatid kaliya hal erey oo sir ah.
 - Tusaalaha manageriga ereyga sirta ah ee lacag la'aanta ah (sanadka 2022): RoboForm, Bitwarden, mSecure iyo Zoho Vault
 - Tusaalayaasha manageriga ereyada sirta ah ee lacagta ah (sanadka 2022): Dashlane, LastPass, NordPass, 1Password, Keeper iyo LogMeOnce



Lähteet: <https://www.kyberturvallisuuskeskus.fi/fi/ajankohtaista/ohjeet-ja-oppaat/pidempi-parempi-nain-teet-hyvan-salasanan>
<https://kotimikro.fi/tietoturva/asiantuntijat-valitse-taydellinen-salasana>
<https://global.techradar.com/fi-fi/best/paras-salasanan-hallintaohjelma> (Viitattu 6.4.2022)